


# KOR U QAAD AMMAANKA

– Yaree ku dhicid dembi ama dhac



TALO IYO TUSAALE KU WAJAHAN  
DADKA WAAYEELKA AH .


Dadka da'doodu kor u dhaaftay 65 sano waxey ka mid yihiin qolooyinka dadka waaweyn ee ugu yaraan la kulma dagaal , handadaad iyo xatooyo ama waxyeelo . Ayadoo ay sidaas tahay ayaa haddana dembiyada laga galo dadka waayeelka ah waxey ku sii hogaamiyaan amni darro . waxaa caadi ah in dhaca iyo xatooyada ay fuliyaan niman iska dhigaya inay wax ka caawinayaan laakiinse in loo xoogsheegto dadka waayeelka wey dhacdaa . Qoraalkan wuxuu ka kooban yahay waxoogaa talooyin ku saabsan sida qofku u yareyn karo qatarta uu ugu jiro in la dhaco iyo waxa aad sameyn karto haddii adigoo talaabooyin taxadar isilaalin ah qaaday haddana lagu soo weeraro.



Dhaca ugu badan ee qabsada dadka waayeelka ah waa jeebsiibka , boorso dafidda , guri dhacaa . dhaca waayeelada ( åldringsbrott ) waxaa loola jeedaa xatooyo jabsasho ama xoogid la'aan ah oo tuuggu ka faa'ideysanayo daciifnimada waayeelka ama isdifaaciddarroda waayeelka oo u sabab ah da'weyni . waxaa muhiim ah in la xasuusto in kuwa falkan dhaca ah ku kacaya ay yihiin dad da' walba leh , ahna rag iyo dumar labadaba , kuwaasoo bixiya muuqaal daacadnimo iyo furfurnaan ku dheehan ayadoo ay ujeedadoodu tahay iney marinhabaabiyaan waayeelka markey ugu deeqayaan caawimaad furan .

# HADDII AAD DEGGAN TAHAY GURI WEYN (OO VILLA) AH AMA GURIYAHA SAFAN.

- U sheeg jiiraankaaga marka aad safar aadeyso .
- ka codso deriskaaga iney waxoogaa alaab usoo xawilaan beerta guriga hortiisa si ay ugu ekaato in aadan guriga ka maqneen.
- Ku kalsoonow keliya farshaxanyaqaan leh shatiga canshuurta shirkadaha iyo xiriir macaamiil wanaagsan .
- La samee(saxiix) heshiis qoraal ah oo qeexaya hawlaha uu farshaxanalugu qabanayo iyo qiimaha hawsha .
- U isticmaal qalabka dareemeyaasha ( sensors) ama saacadda cabirka iftiiminta guriga dibediisa.



Waxaa jira talaabooyin badan oo sahal ah kuwaasoo kor u qaadi kara ammaanka gurigaaga –markaad guriga joogta iyo markaad ka maqantahayba oo aad safar aaddo. Iska kantarool shirkadda sida shirkadda farshaxanlaha inta aadan hawl ku amminin.

# GUDAHA GURIGA

- Sameyso birta qufulka iyo duleelka isha ee albaabka dibedda . haddii aad isticmaasho kursiga dadka curyaanka ah , dhererka duleelka ka dhig mid kugu haboon. Adeegso shirkad sumcad ku leh hawsha noocan ah. Isku day inaadan keligaa aheyn marka rakibaadda laga shaqeynayo.
- Haddii qof aadan garaneyn uu albaabka soo garaaco , fur keliya siligga isku xira alwaaxa albaabka iyo albaabka , kana codso inuu is sheego qofkuu yahay intaadan wada furin albaabka . haddii uu yahay qof shisheeye raba inuu kaa amaahdo telefoon dirsasho ama koob biyo ah , ha ka furin .
- Haddii aad deggan tahay dabaqa hoose ee guriga , usamee quful balkoonka iyo barxadda weyn ee guriga iyo daaqadda.
- Mar walba albaabada quful .
- Ha ku keydsan guriga lacag badan , dahabkaaga sanduuqa ku xiro . axsan inaad isticmaasho sanduuqa bankiga .
- Quful dheeraad ah ku xir guriga markaad tegeysid laakiin ma ahan markaad guriga joogtid.
- Ha dhigan boorsada gacanta iyo tan yar ee lacagta qolka weyn ee daarada guriga .
- Xisaabi oo qor waxyaabaha qiimaha leh ee aad qabto , sawirna ka wada qaad.

- Waa in milkiilaha guriga la wargeliyaa ka hor inta uusan farshaxananyaaqanku ka hawlgelin guriga.
- Daryeelka bukaanka iyo xafiiska daryeelka waayeeelka waa iney kuu soo wargeliyaan marka ay kuu imaanayaan.
- Ka codso asxaabtaada iney ku soo wacaan inta ayan ku soo booqan si aad waqti go'an ugu heshiisaan booqashada.
- Ku dhammee hawlaha lacag bixinta bankiga habka lacag bixinta ee " plusgiro " .
- Ha amaahin kaarkaaga bankiga ama kaarka amaahda (kreditkort) cidna ama cid jiiraanka ah .
- Lambarkaaga bankiga ama lambarkaaga koodka sirta ha u gudbin cid telefoon kuu soo dirtay oo iska dhigeysa iney bankiga ka soo hadleyso . bangaariyadu sidaa uma shaqeeyaan markey la xiriirayaan macaamiishooda .
- Albaabka hortii waxba ha ku iibsan - waxey tusineysaa inay lacag guriga kuu taal .



Ha saxiixin waxbana haddii aadan hubin waxey tahay .sidoo kale dadka sida iibiyeyaasha telefoonka ( telefonförsäljare ): ha ka gadanin ama hala gelin heshiis telefoonka gudhiisa lagu sameyey adigoo aadan hubsan.

- Nal ama raadiye shidan uga tag markaad guriga ka tegeysid si ay ugu muuqato in aad guriga joogto.
- Marka aad safar aadeyso , kula heshii jiiraankaaga iny sanduuqa boostada ee albaabka dhinaciisa ah waraaqaha kuu soo dhaca kaaga saaraan.
- Hakki oo yara jooji jaraaidka kuu soo dhaca iyo waraaqaha lagaa rabo inaad marwalba dib uga jawaabto haddii muddo dheer aad maqnaan doonto .
- Fariin sajiilan ha uga tegin telefoonka ama kombiyuutarka oo aad ku caddeyneysid inaad safar aaday.

## GURIGA DIBADDII

- Iska diid marka qof aadan garaneyn uu rabo inuu kaa caawiyayo inuu kuu qaado boorsada ama gaariga adeegga albaabka guriga ama jaranjarada hore adoo fuulaya.
- Iska ilaali oo taxadar ku adeego markaad lacag kala soo baxeyso bankiga gidaarka ( bankomat ). Qof aadan aqoon ha u ogolaan inuu ku saacido.
- Lacagtaada cidna ha tusin , koodkaaga bankiga cidna ha tusin . koodkaaga bankiga boorsadaada jeebka ha ku xareysanin.
- Markaad dibedda u baxeyso ha qaadan lacag ka badan inta aad u baahan tahay.
- Lacagtaada kala qeybi oo inyar walibaa meel ku xareyso.

- Ku foojignow in lagu soo celiyo lacag sarif sax ah - tusaale ma ahan keliya in lagusoo celiyo xaashi boqol ah haddii aad bixisay xaashi shan boqol ah .
- Isticmaal qeybta gudaha ee boorsada jeebka . ha isticmaalin qeybta gadaal.
- Ha ku wada qaadan fureyaasha iyo lacagtuba boorsada gacanta .
- Muraayadda indhaha ku heyso jeebka si aadan markaad u baahato boorsada u furin.
- Boorsada gacanta oo gudaha ka xiran ku heyso laabta.
- Marnaba boorsada ay kugu dhex jirto boorsada yar ee lacagta ha dul saarin gaariga adeegashada dukaanada.
- Marka aad joogto meel dadku ku badan yihiin , lahow feejignaan dheeraad ah ; sida bas gudihiisa, marinka jidka tareenka dhulka ( tunnelbanna ) iyo safka loogu jiro lacag bixinta makhalka dukaanada.



Tuugada boorsada xadda waxey isku dayaan iney meel kale kugu mashquuliyaan . waxaa badanaaba dhacda in uu Nin ku mashquuliyo halka uu mid kalena boorsada kaa siibanayo. Marka dad badani ay agtaada joogaan , feejignaan dheeraad ah lahow, sida marka aad baska saaran tahay , markaad safka ugu jirto makhalka lacagbixinta.

# MARKA GURI LA JABSADO

- Haddii aad ka shakido in nin qalaad ah uu guriga ku dhex jiro , ha gelin guriga ee telefoonka booliiska ee 112 dir .
- Isku day inaad waxbadan ka xasuusato dadka joogay iyo xaaladda guriga si aad booliiska ugu qeexo wax walba.
- Samee ashtako booliis adigoo isticmaalaya lambarka telefoonka 114 14 ama internetka **HYPERLINK** ”<http://www.polisen.se>” [www.polisen.se](http://www.polisen.se) .
- Ha taaban wax walboo uu dembiiluhu la soo galay , booliiska ayaa laga yaabaa iney ka helaan calaamado ku hogaaminaya in dembiilaha la soo qabto.
- Haddii boorsadaada yar ee lacagta lagaa xaday , si deg deg ah u xir kaarkaaga bankiga iyo waraaqahaaga aqoonsiga .
- Haddii uu ku dhacay nin iibiye ama farshaxanle ah , la xiriir xafiiska wargelinta macaamiisha oo xaafad waliba leh.

## BOORSODAFID (VÄSKRYCKNING )


Boorsodafid (väskryckning ) waxaa loola jeedaain qof uu boorsada si xawli leh ku qaato , asagoo baaskiil saaran ama ordaya.

- Ha ku mintidin ! lacagi ma soo celiso lafta bowdada ah ama feedha oo lagaa jebiyey.

**MARKA DEMBI DHAC UU SOCDO ,  
DIR TELEFOONKA 112.**

# SI AAD ASHTAKO U SAMEYSID WAAYO

- Waa sharciga si dembiga looga gun gaaro .
- Waa shardi si aad magdhaw ugu hesho shirkadda aad caymiska kaga jirto.
- Waxey kuu sahalsiineysaa inay kuu soo noqdaan alaabta lagaa xaday marka booliisku ay dib u helaan.



# HALKAAN AYAAD KA HELI KARTAA TALO IYO TAAGEERO

## **Tabaruceyaasha booliska :**

Tabaruceyaasha booliiska waa kuwa ay qorteen oo ay tababareen hey'adda booliiska ee qaabislan arrimaha dhaca iyo xatooyada.

Haddii aad u baahantahay taageero iyo caawimaad marka aad ashtako sameyneysid wuxuu booliiska kula xiriirinayaa tabaruce.

## **Heeganka dadka la dhacay (brottsofferjouren) 0200-212019**

- Taageero caadifi iyo talooyin caqli gal ah .
- Taageero si aad u la xiriiri karto hey'adaha dawladda iyo shirkadaha caymiska .
- Taageero dhinaca kiiska maxkamadda ah.
- Qof aad kala sheekeysan karto dhibkaaga oo fahamsan xaaladaha dhaca iyo xatooyada.

## **Heeganka dumarka (Kvinnojourer)**

Xafiiska maamulka arrimaha bulshadda ( socialtjänst-förvaltningen ), ururada tabaruca u shaqeeya , shirkadaha gaarka ah , iyo ERSTA DIAKONI waxey dhammaantood ugu deeqaan dumarka la dhibaateeyey ama la xoogay degaan la ilaalinayo oo la difaacayo. Haddii aad qatar ugu sugan tahay in lagu xoog sheegto , aadna u baahantahay degaan difaac leh , la xiriir heeganka arrimaha bulshadda telefoonka 50840000 .

**HEEGANKA DEMBIYADA DHACA IYO  
XATOOPYADA : 0200-212019**

# **SIDEE BAAN U SAMEEYAA ASHTAKADA ?**

## **Dhac & jabsasho socota:**

Haddii aad la kulanto dhac socda , dir oo wac telefoonka 112.

## **Haddii aad la kulanto dembi dhac durba la sameeyey iyo waxyaabo kale oo aan degdeg aheyn:**

Waxa aad ashtako u sameyn kartaa habab kala duwan :

- Adiga oo garaaca telefoonka booliiska 114 14.
- Adigoo taga saldhigga booliiska kugu dhaw.
- Adigoo ashtako ka sameeya bogga internetka [www.polisen.se](http://www.polisen.se) .

Waxaad caawimaad weydiisan kartaa qof aad ku kalsoon tahay..

## **Macluumaadkan sii diyaarso :**

- Lambarka aqoonsiga shakhsiga ee qofka ashtakada sameynaya.
  - Lambarka aqoonsiga shakhsiga ee qofka dhaca loo geystay ( dhibane – målsägande )
  - Shirkadda caymiska ee dhibanaha .
  - Lambarka soosaarista warshadda Ä( tillverkningsnummer ) , lambarka fareemka, lambarka IMEI ee moobilka ama shayga lagaa xaday .
- Waqtiga dhabta ah iyo meesha uu dembigu ka dhacay .

**ARRIMAHA AAD DEGDEGGA AHEYN ,  
GARAAC LAMBARKA 114 14 .**

## MARKAA MAXA DHACAYA ?

Marka ay ashtakadaada soo gaarto booliiska waxaa laguugu yeerayaa wareysi . waxaa markaa muhiim ah in aad si faahfaahsan uga hadashid sida wax u dhaceen. Handadaad nooc ah, dhac ama dembi kale oo lagu geystay ? ma tqaan qofka ama qolada kugu sameysay ? waqti dheer miyey socotay dhibta lagu geystay ? wax markhaati ah ma jiraan ?

Haddii aad rabto inaad magdhaw ka qaadato dhibta kaa soo gaartay dembiga lagaa galay , waa inaad sheegataa marka wareysiga lagula yeelanayo .

### **Sidee baan yeelaa haddii ley dhaawaco ?\***

Haddii jirdil laguugu sameeyo , u aad dhakhtar si dhaawaca ku gaaray loo xaqiijiyo . sawiro dhaawaca ah wuxuu gundhig u noqon karaa caddeyn caddaaladeed , taasoo qeyb ka noqoneysa oo macquul uga dhigi karta xeerilaaliyaha inuu caddeeyo dembiga lagaa galay . sawiraduse waa in booliiska ama shaqaalaha cusbitaalka ay qaadaan .

### **Marka wareysi la ila yeelanayo , cid kale ma i wehlin kartaa?**

Haa , saaxiibkaa waa uu kula joogi karaa inta wareysigu socdo . dembiyada qaarkood waxaad xitaa xaq u leedahay gacanyaraha dhibanaha (( målsägandebitråde ) , xaaladanse dhibbanaha waa adiga ) . gacanyaraha dhibanaha badanaaba waa sharciyaqaan wuxuuna ku siinayaa taageero iyo caawimaad inta baaritaanka qadiyadu socoto , marka maxkamaddu bilaabato iyo marka magdhaw la dalbanayo. Taageeradani wax kharaj ah kuguma fadhido .

## MAXAA DHACAYA INTA MAXKAMADDU SOCOTO ?

Marka ay baaritaanka hore ee booliiska dhammaato , xeerilaaliyaha guud ( qareenka ) ayaa xukminaya in eedeysanaha dacwada lagu soo oogo iyo in kale . oogid dacwo waxey waddada u fureysaa wareysi afka ah ee maxkamadda horteeda .

**Haddii lagu geysto jirdil waxaa muhiim ah inaad daaweyn raadsato iskana hubiso in dhaawaca kugu yaala la sawiro oo la xaqiijyo . Taasi waxey muhiim u tahay si aad ku hesho magdhaw.**

waxaa halkaa lagu dhegeysanayaa adiga , eedeysanaha iyo markhaatiyaasha jira . markaa ka dibna makamadda ayaa qiimeyneysa qadiyadda kadibna si sharci ah xukunka kaga rideysa maxkamadda horteeda . qofka aanu ku qanacsaneen xukunka maxkamadda , wuxuu dacwad ka qaadan karaa maxkamadda rafcaanka .

### **Muxuu yahay taageero markhaati ?**

Inta maxkamaddu socoto waxaad heli kartaa taageero markhaati . waa qof si samafal ah u shaqeeya oo siiya warbixin la isticmaali karo iyo taageero lug ku leh maxkamadda.

### **Ma inaan afka swiidhishka ku hadlaa ?**

Maya , waxaad xaq u leedahay in lagu qabto tarjume haddii aad u baahantahay marka baaritaanka hore uu socdo iyo inta maxkamaddu socoto labadaba . Waxaad kaloo tarjumaan heli kartaa marka aad la xiriireyso hey'adaha kale ee dawladda sida xafiiska arrimaha bulshadda ( socialtjänsten).

### **Haddii la i handado , ma heli karaa difaac ?**

Booliiska ayaa qiyaasaya qatarta aad ku sugantahay in dib laguugu geysto dhibaato di lama handadaad ah. Ujeedada waa in la helo wax gundhig u ah in la qaado talaabooyin difaac si looga horjoogsado in dembi soo noqnoqonaya iyo dhib daran . talaabooyinka difaacidda waxaa markasta lala beegaa baahida gaarka ah ee shakhsiga, waxayna ka koobnaan kartaa dhammaan siinyaalada digniinta ammaanka oo loo gudbiyo dad badan . Dhibanaha la handaday waa uu ka dalban karaa hey'adda canshuuraha qeybteeda diiwaangelinta dadka in macluumaadkiisa laga xanibo dad kale . xanibaadda macluumaadka waxey joojineysaa gudbinta warbixinta cinwaanka iyo shakhsiyadda qofka . haddii shakhsigu danta ku kalifto oo meel sir ah u wareego , wuxuu codsan karaa siihaynta diiwaanka ( kvarskrivning ) taasoo mecneheedu yahay in shakhsigu uu ka diiwaangeshanaado adreeskiisa hore oo markaana hey'adda canshuuraha iyo diiwaangelinta ayaa waraaqaha uga soo xiriirinaya deegaankiisa cusub.

**Inta maxkamaddu socoto waad heli kartaa taageero markhaati . waxaad kaloo xaq u leedahay caawino tarjumaad inta baaritaanka booliisku socdo iyo inta maxkamaddu socoto .**

## **BOOLIISKA**

Garaac oo wac 112 haddii aad rabto in booliiska islamarkiiba kuu yimaado .  
Garaac oo wac 114 14 haddii aad rabto wadatashi iyo haddii aaney xaaladdu degdeg aheyn.

## **XANIBAADDA**

Sidee buu qofku ku xiri karaa buuggiisa bankiga , kaarka bankiga ee ka shaqeeya bankiyo badan . wac bankiga ama booliiska kadibna weydii su'aashan.

## **CAYMISKA**

Ogoow nooca difaaca caymiska ee aad leedahay. Marka hore ka ogoow caymiska guriga .

## **HEEGANKA DADKA WAAYEELKA IYO DADKA NAAFADA AH EE STOCKHOLM.**

Dir oo wac 50840700 haddaad u baahato daryeel degdeg ah .

## **WAKIILKA DADKA WAAYEELKA AH**

Wakiilka dadka waayeelka ah waa qof dhexdhexaad ah oo si xor ah u shaqeeya , wuxuuna talo ka siin karaa xaaladda dhib la geystay . wac telefoonka 50836210 ama dir email [aldreombudsmanen@aldre.stockholm.se](mailto:aldreombudsmanen@aldre.stockholm.se).

## **WAAYEELKA TOOS ( ÄLDRE DIREKT )**

Xafiiska Toos Waayeelka ( äldre direkt ) waxaad kala xiriiri kartaa nooc walba oo ah qaddiyadaha ku saabsan dadka waayeelka ah ee gobolka Stockholm. Wac telefoonka 806565 .

## **TALO IYO WAXBIXINO DHEERAAD AH.**

Waxaad talo iyo warbixino dheeraad ah oo ku saabsan ammaanka nololmaalmeedka ka heli kartaa hey'adda difaaca iyo diyaargarowga (MSB= Myndighet för samhällsskydd och beredskap) [HYPERLINK "http://www.msbmyndigheten.se"](http://www.msbmyndigheten.se) www.msbmyndigheten.se iyo shabakadda difaaca (skyddsnetet) oo ah wadashaqeyn ka dhexeysa hey'addo badan iyo ururo badan .shabakadda difaaca waxaad ka heli kartaa [www.skyddnetet.se](http://www.skyddnetet.se)

Qoraalada waraaqahani waxaa xilligii dayrta ee 2009 laga soo minguuriyey xafiiska maamulka waayeelada ee gobolka Stockholm ayadoo wada shaqeyn lala galay hey'adda booliiska gobolka Stockholm , heeganka dembiyada , xafiiska guryaha Micasa fastigheter, iyo ururada hawlgabka PRO,RPG,SPF,SPRF iyo SKPF . wuxuuna ku dhisan yahay warbixino kakala yimid Göteborg 2005, Örebro 2006 iyo Kanada 2008.



**XAFIISKA MAAMULKA WAAYEELADA**

106 64 Stockholm  
Tfn: 08-508 36 200

[www.stockholm.se](http://www.stockholm.se)



**Polisen**

106 75 Stockholm  
Tfn: 114 14

[www.polisen.se](http://www.polisen.se)